Koodhka Asluubta ee qandaraasalyeyaasha guryaha

Dadweynaha oo la ay la socodaan tilmaamaha loogu talogalyay kireysteyaasha guryaha dadweynaha.

Hordhac

Wasaarada Adeegyada Insaanka (Department of Human Services) waxay shaqalyeysa qandaraasaleyaasha iskood u madaxbanaan ama u shaqeysta si ay u qabtaan dacyactirida iyo kor qaadida bilicida guryaha dadweynaha.

Shaqooyinka ay qabanayaan qandaraaslayaasha waxay kala yihiin dayactir yar yar iyo dayactir weyn. Shaqooyinka inta badan waxaa la qabta iyado guryaha lagu jiro ama la degan yahay taasina waxay keeni karta xasiloni daro ama arbush ku yimaada kiraystayaasha iyo kuwo dayactiraya guryaha dadweynaha oo Qandaraaslayaasha ah.

Si shaqada guriga laga qabanayo macquul u noqoto, waxaa loo bahaan yahay kiraystayaasha iyo qandaraasalyeyaasha in uu ka dhex dhaco iskaashi buuxa. Waxaa kale oo loo bahaan yahay in ay qadariyaan heshiiskii ay wada galeen, waa in ay isula maacaamilaan si wanaagsan iyo waa in ay si daxadaran u dhowraan hantida (sida qalabka, guriga alaabta taal), dhowritaankaas oo ku dhehan xushmo iyo edeb.

Qandaraasalyeyaasha waxay raacayaan Koodhka Asluubta markey ka shaqeynayaan guryaha la degen yahay. Koodhka Asluubta waxaa ku qoran sharuuc waanineysa Qandaraasalyeyaasha markey shaqo ka qabanayaan haya'ada guryeenta.

Shaqaalaha Qandaraasalyeyaasha, Qandaraasalyeyaasha hoose (sub-contract) iyo kuwa Qandaraasalyeyaasha wax ka iibiya (suppliers) waxaa la siinaya nuqulka Koodhka Asluubta. Waxaan looga malyaysanaya in ay si fiican u fahmaan koodhka inta ay u bilaabin shaqo Haya'ada Gurisiinta.

Haya'ada Gurisiinta ma shaqaaleyso Qandaraasalyeyaasha aan fahmin koodhkaan.

Koodhka Asluubta

Qandaraasaluhu wuxuu u baahan doonaa:

- Waxaa loo bahan yahay in markasto Qandaraasaluhu xiran yahay aqoonsi (teesaro), haddii Qandaraasaluhu aan la siin aqoonsi, waa in u awood warqadeed ka wata Haya'ada Guryeenta ama warqad shaqo amar. Waa in uu isu sheega kireestaha marka uu ka codsado.

- Waa in u labista hanaanka shaqada logu talagalay iyo waa in u ka taxadara muqaalka shaqsiyeed.

- Edeb iyo akhlaaq waa in aad ku dhaqanta markasta, waxaa loo bahan yahay inaad dhawaaqa yareesid, si looga ilaaliyo buuq iyo xasilooni daro ku timaada kireystayaasha.
- Anshax wanaagsan waa inaad ula dhaqantaa kirsteyaasha gaar ahaan dhaqankooda.

- Waa inaad ka foojignaata inaad kala sheekeysatid qorshaha hawleedka Haya'ada Gurisiinta kirstayaasha ama arrimo la xiriira shaqooyinkii hore oo laga qabtay guryaha ama degaanka.

- Waa inaad siisa tixgilin kirsteyaasha amnigooda, caafimaadkooda, nabadda degaanka iyo ku istareexidda rugta. Waxaa loo bahan yahay in aad u sameysid gunno shaqaalaha, ciyaalaka, xayawaanka guri joogtada aha iyo kuwa u bahaan taxadarka gaarka ah.

- Waa in aad ka foojignaata in ku dhaaftid dhoobo, ranji, dufan iyo waxyaalah wasakh ah ama fadaro ah guryaha lagu jiro ama la degen yahay. Waxaa loo bahan yahay in aad ka hagaajisa wixii wasakha ama waxyeelo soo gartey guriga ugan tagta guriga sidii uu ah inta aadan bilaabin dayactirka.

- Waa inaad siisaa kirsteyaasha ogaysiis inta aadan bilaabin shaqada. Ugana digta intay qaadan karto shaqada qiyaas ahaan iyo sida shaqda u kala horeyso. Haddii wax isbeddel ah yimaadana waxaa loo bahan yahay inaad la socodsiiso kireystayaasha.

- Waa inaad u sharaxadaa kirsteyaasha shaqada aad qabaneysid nooca ay tahay, waqtiga ay qaadanenyso wixii wasakha, ama habaaska shaqada iyo wixii shaqo joojis ku yimaada adeegyaasha rugta. Waa in aad u sheegta dhismah dariska in ay sameeyneyso.

- Qandaraasyada shaqooyinka dayactirka iyo dib-u-cusboonaynta waxay shaqada bilaabayaan inta u dhexeysa (8.00am ila 5.00pm Isniinta ila Jumcaha. Waqtiyada kalena waxay ku xiran tahay hiishiiska ka dhex dhac kirstayaasha iyo Qandaraasalyeyaasha. Dayactirka deg deg ah, shaqada waxay bilaabata inta u dhexeysa 8.30am -5.30pm Isniinta ila Sabtida.

- Dayactirka iyo dib-u-cusboonaynta guud ee shaqada, waa in dib loo soo celiya isticmaalka adeegayaasha sida makiinadda cuntada iyo mushqulaha maalin kasta marka shaqada ay dhammaato. Waa in aad ka nadiifisa haraaka shaqada rugata degaan ugana tagtaa guriga ama rugta shaqada xaalad wacan oo lagu noolan karo.

- Waa inaad fasax weydiisata kiraysteyaasha musqulahooda. Waa inaad la gaartaa heshiis kiraysteyaasha wixii ku saabasan isticmaalka korontada, gaaska iyo biyaha guryahooda, una celisaa wixii kharash ahaa oo aad ka isticmaashey.

Qandaraasle ahaan ma adeegsan kartid:

- inaadan isticmaalin hadalo aad uxun ama luqad xun, aadan muusikada dheereen ama cod dhaadheer aadan iskula hadlin ama aadan u dhaqmin si foolxun.

- Inaadan wax ka sheegin rugta degaanka kirstayaasha iyo xaalad nololeedka kirstayaasha.

- Inaadan ku cabin ama ku dhuuqin sigaar gudaha rugta shaqada, aadna ku cabin khamiri, ama aad isticimaahsid waxyaalaha mukhaadarad ah oo mamnuuca ah ama adigoo cabsan mukhadarad aad qabaneysid shaqada.

- inaad cunto ku cuntid, aad uga tagtid xaashisho duudban, dufanka xaashyahii aad iska dirtay ama weel maran.

- Inaad keentid lama ogola marti goobta shaqada ama asxaabtaada kugu soo booqoodaan koobta shaqada, ama aad la timaadid xayawaan ama xaywaanka guri joogtada ah.

- Inaad faragelin ku sameysid ama dhaqan xumid ku sameysid xayawaanka u lee yaha kirstayaasha ama xayaawaanka guri joogtada ah.

- Inaad xanibto dariiq gaarka ah oo guri ama ka kirstayaasha ka dhexeeya wadiiqo ama dariiq, is-gooys ama jidka meesha lagu talagalay in laga talaabo, kirstayaasha halka ay baaburta dhigtaan (parking) adigoo aadan weydisan fasax marka hore iyo waqtiga lagu siiyo aadan ka badsan.

- Isticmaalid meel kasta oo ka mid ah dhismah, ama meesha lagu talgaly in wax lagu xareeyo ee dhismah, baabuurta (parking) keeda ama ula jeeda kasta lahood, ma isticimaali kartid adigo ka heesan heshiish ama ogolaasho Haya′ada Guryeenta ama kirstayaasha.

- Galid ama ku nagaansho guri la degan yahay waa mamnuuc haddii kirstaha u ka maqan yahay, adigo aad ka heesan oglasho hore kirstaha. Haddii aad ka heli weydo ogolasho kirstaha waxaad arrintaas kala xajooneysa Haya′ada.

- isticimaalida telefannka kiraystayaasha waa mabnuuc, ila wixii (emergency) mooye

- Ka tagid gurigii aado xirin ama aalada shaqada waxyeelo geestey

- Isku dayid xalid xaalado ay kaliftay shaqada aad ka qabaneyso rugta kiraystaha oo wax ka badeley nolol qaabeedka kireystaha ama xaaladuh ay adag yiihii xaliskooda ama la doodid, la murantid kirstayaasha. Haddii ay kula soo gudboonato xaaladaas waa in aad ku xalisa degnaan iyo akhlaaq wacan kalna xaajooda dhibtaan haya′ada.

Tilmaamaha loogu talogalay kirsteyaasha (Guidelines for tenants):

Kireyste ahaan waxaa ku saraan masuuliyadda inaad:

- Edeb iyo akhlaaq waa in aad kula dhaqanta markastaba qandaraasaleyaasha.

- Waa inaad siisa markasta qandaraasaleyaasha xoriyad iyo doowgii ay mari lahayeen si ay u gutaan howshooda, sidaas darteed waxaa laga yaaba in shaqada ku dhameeyaan waqti gaaban oo maqul ah.

- Ilaalin balaanka niga dhaxeeya adiga iyo qandaraasaleyaasha. Haddii ay soo daahaan u ogolow in aad siisid waqti maquul ah inta aadan ka tagin gurikaada.

- Xakamey ama xirxir xayawaankaada ee aad guri ku heesatid ama xayawaanka guri joogtada ah mar haddii loga baqayo in khatar geliyaan caafimaadka iyo nabada gelyada (qandaraasaleyaasha) ama laga yaabi in uu ka baxsado rugtaada ama gurikaada. Waxaa kale oo aad yeesha sida uu ka codsado qandaraasaleyaasha.

- Waa inaad faaruqisa khaanadah musqulah iyo kuwa kushiinkaba haddii shaqo laga qabanayo ama haddii uu qandaraasaluhu ku weediyo ama ka codsado.

- Waa inaad ka qaada guriga alaabta sharaxaad, masawirada, dharka iyo qalab shaqsiyeedka iyo alaabta yar yar iyo alaab guriga ku ragiban. Qandaraasaluhu waa ka caawimayaa in u kula raro wixii alaab guriyeedka waaweyn (sida kuraasta, miisaska iwm), qalab farsamiidka iyo wixii la mid ah.

- Waa inaad xushmeesa xaquuda dadyowka kale ama dadka kale oo ay ka mid yihiin, qandaraasalayaasha, la taliyaasha iyo shaqaalaha haya′ada si ay u dareeman ammaan. Haddii si dhab ah ama laga yaaba in ay soo gaartey waxyeelo qalabka ama alada qandaraasalayaasha ama hanjaabad aad ku sameysid ama xayawaankaada guri jooge ah u sameeyo, qandaraasalayaasha waxay arruursanayaan qalabkooda waan ka tagaayaan gurikaada isla markaana waxay war gelinayaan haya′ada.

- Barnaamijkii hore loo sameeyey ee dayactirika iyo dib-u-cusboonaynta guriga, haddii aad saluugtey farsamadii uu sameyey qandaraaslahu u sheeg ama kala xaajood la taliyaasha haya′adda; marna hakala xaajoon qandaraasalaha. Waxii la xiriira in si degdeg ah loo sameeyo wac ama telefan u dir Xarunta Maintenance Call Centre.

- Waxaad saxiixdaa jadwalka Dalabyada Qandaraaska ama Dalbayada Shaqooyinka marka shaqada la dhameystiro oo keliya.

- Haddii aad dooneysid in wax laga beddelo hawl-qabadka shaqada ka socoto dhismah waxaad la kulanta xafiiska guryeenta degaankaada. Ha weydiin qandaraasalayaasha ama la taliyaasha haya′ada. Dayactirka dhismaha waxaa go′aamiya ama go′aankeed gaara Hay′adda. Waxna kama beddeli karaan qandaraasalayaasha ama la taliyaasha haya′ada.

- Waxaad la xiriirta xafiiska guryaha degaankaagaa haddii aad dooneysid macluumaad intaa ka badan ama dooneysid in gacan lagaa siiyo rarida ama si adag u xirid milkiyadaada.

Masuuliyada la wadaago:

- Shaqooyinka dayactirka iyo dib-u-cusboonaynta la qorsheeyey, qandaraasalayaasha iyo kirsteyaasha waxay wada jir ahaan u baarayaan ama baaris ku sameynayaan alaab guriyeedka waaweyn (sida kuraasta, miisaska iwm), qalab farsamiidka ee rugta shaqada waxay qorayaan wixii waxyeelo leh inta ay shaqada bilaabin.

- Haddii aad aragtid wax shaci daro ah, ay ka mid yahay qoys degaalaya ama dhib isku haya, waxaa lagaaga bahaan yahay inaad ka taxadartid naftaada. Waxaa kale oo loo bahan yahay inaad wacadid booliska (000), Ambalaas ama gargaarka degdegga ah ee ku haboon xaaladaas. Wax kale oo loo bahan yahay in aad la socod siisid haya′da.

- Haddii wax tuuganimo ay dhacdo la xariir booliska iyo haya′ada.

Jebinta Koodhka:

Kireystaha aaminsan in qandaraasalayaasha ay jebiyeen koodhkan, fadlan la xariir xafiiska guryaha degaankaaga sidaas darteed la taliyaasha iyo maamulayaasha guud waxay ka qaadi karaan talaabada ku haboon falkaas.

Haddii aad tahay qandaraasle aadna aminsan tahay in kireystaha uuna yeelayn, Tilmaamaha loogu talogalay kirsteyaasha (Guidelines for tenants) waxaad qaadi kartaa ficil aad la xariiri karta haya′ada.

WareysigaGurisiinta taleefanku waa 1300 650 172.

Waxaa ogolaaday Xukuumadda Victoria
50 Lonsdale Street Melbourne
October 2007.